Assalaamu caleykum, walaalayaal waxaan halkaan ka dirayaa fariimo ku wajahan Mujatamaca Soomaaliyeed.

Labo qeyb oo kamid ah fariinteyda waxaan u kala dhigayaa mid guud iyo mid gaar ahaaneed waxaana u dirayaa Dumarka Soomaaliyeed.

Labada fariin ee ii dhimanna si lamid ah ayaan ayadana u kala qeybinayaa mid guud oo ku wajahan mujtamaca Soomaaliyeed gebi ahaantood iyo mid gaar ah oo ayadana ku wajahan dhalinyarada kuwooda Ragga ah ee Soomaaliyeed.

In aan fariimahaan dirina waxaa igu dhaliyay dhacdo ruuxi afka ka xirtaahi kana aamuso iskana indhatiro loo arki karo inuu raali

kayahay, waana wixii ka dhacay Goldogob, taana waa mid Taariikhda geli doonto kulana talinayo qoraayahanada Soomaaliyeed in aay ka qoraan buuggaag ee ugu magacdarayaan Tusaale ahaan (Dhacdadii Goldogob).

Inta aanan u gudagelin fariimahayga waxaan rabaa in aan tilmaamo ka bixiyo Dumarka anigoo baraarujinaya, waxaana ka rajeenayaa in aynan ii arkin ruux qiimatiraya Dumarka, Dumarka ayaa ka qiima iyo waxtar badan Ragga, hadeey toosnaadaan mujtamici dhan ayaa toosayo, hadeey qaloocdaanna waa cagsigeed, ujeedkeyguna waa in ay ogsoonaadaan waxa ay yihiin iyo waxa laga damacsanyahay,

waana laba kala duwan, waa Dumar wanaagsan, qiimo iyo sharaf leh, laguna yaqaano dhowrsanaan, diin jaceyl, wadaniyad, dadkoodana jecel, balse sifada ay la wadaagaan dumarka kale ee khalaad ayaa ah Faan ama hadii aan si kale u dhigo magac jacayl, taana waxa ay noqotay damici inalaga lahaa mid lagu gaaro, ama waddo ay Reer-galbeedku inoo soo maraan.

Dumarka Soomaaliyeed waxaan u qeybiyay sedex:

1-kuwa Damana ah; macnaha oo aanan waxba ka warhayn (dhanka siyaasadda iyo waxyaalaha lala damacsanyahay).

2-kuwa Daab ah; waa kuwa aay Reer galbeedku inta badan ka

faa’ideestaan, shacab ayaana u badan u ololeeya una istaaga una sacbatuma ajandayaal loo soo dhiibo qeybta sedexaad ee aan soo wado, kumana baraarugsana waxa ka dhalan doono, sidaa ayaan ugu magacdaray Daab, maxaayeelay Daabku haduu ogaan lahaa waxa loogu talagalay in uu yahay geed in lagu goosto ma uusan yeeleen, maxaayeelay isla Geedkiisa baa lagu goynayaa.

3- kuwa aan ku tilmaamay Faas-ka, waana kuwa ugu khatarta badan, cibra-na waan ka heysanaa, waana wada xasuusanaa tii ka dhacday Dalka, taas oo sabab u eheed Dumarka noocuudu faaska yahay, waa dhacdadii lagu xasuuqay culumaa’udiinki Soomaaliyeed

laguna soo saaray fatwadii madaxweyne -Allaha saamexee-ee liddiga ku eheed tii Alle thuluth ma jiro rubuc-na ma jiro, sababta aan dumarka noocaan ah Faas-ka ugu bixiyayna waxaa weeyaan waxba ma faa’idaan balse ayagaa wax lagu faa’idaa waa sidi Ey-ga ugaarta oo kale wixi lagu ugaarto sad ahaan waxa ay uhelaan waa balakh, dumarka noocaan ahna Dal dhan ayey u burburinayaan diintiisa wax aanan nacfi ugu jirin, ayaguna way ku khasaarayaan had ii ay guuleystaan amaba guuldareestaan.

Intaa waxaan kaga talaabayaa qeybihii dumarka ee aan soo sifeeyay, balse waxaan usoo jeedinayaa labada qeybood ee horo in eey baraarugaan, kuna

talagalaan in hadii ay dhibaato dalka dhacdo dhibanaha koowaad ayaga yihiin, qeybta sedexaadse waa qurbajoog, balaayo hadii ay dhacdo banaankaas ayay ka joogaan adinka iyo owlaadiinuse waad dhadhaminaysaan wixi dhoco qaraarkii!

Waxaan u gudagalayaa fariintayda qeybteeda hore ee aan u diriyay Dumarka oo idil, walaalayaal waxaan maqli jirnay gabar heblaayaa la kufsaday, kufsi baa meel heblaayo ka dhacay, gabar la kufsaday ayaa meytkeeda lasoo dhigay meel heblaayo, waynaga badbadatay, waana la qabatinnay, lamana yaabi jirin, waxna lagama qaban, balse tan maantay damiirkanaga kicisay waa wixi foolxumaa oo

ciddi sameysaahi gamban jirtay isna dhihi jirtay armaad fashilantaa in maantay weji kale yeelatay, la iska duubay fiidiyow si kalsooni ku dheehantahay iyo islaweyni, lana soo dhigay baraha bulshada, faaxishadi eey sameeyeen kuma ekaan ayaga keliya ee baraha bulshada ku kulanto ayay soo dhexdhigeen, kuwii falkaas sameeyay xukonkooda cafis iyo ciqaabba waxaan u daaynayaa ciddi ay u taal, balse hadii la fududeesta maxaa ka dhalandoono?

Waa tan igu qasabtay in aan fariintaan idiin soo jeediyo.

Markahore waa in aad ka dumar ahaan ogaataan naagti loo baahdo in la kufsado ayadoonan

qabiil(laandheer iyo laangaab) midna loo eegeen ayaa lagula kici karaa falkaas, iskaba daa middaas oo mashruuc ayuuba noqon karaa dumarka tii la rabaahi in la afduubo lala fogaado la gato, qofkii lagu qabtaahina falkaas ku tala jiro in uu heesto qof difaaco badbaadiyana, amaba is dhahayo xalka waxaa laguugu soo gabagabeen hadii gabadhaan lagugu qabto afar faataxo iyo gabadha oo laguu guuriyo, sidaasna uu ku fududeesto, marka sidee baa waxaan looga hortagi karaa?

Waxaa haboon in aay isku duubni deegaan ah jirto, la iskana warhayo, odayaashu waxa aay leeyihiin Oday dhaqameedyo, Dumarkuna waa in aay Habar-

dhaqameedyo sameesataanna, falalka noocaan oo kale ah ee dhaco kuwii go’aanka ka gaari lahaa noqotaan, yeelatiinna cod idiin hadlo, ciqaabta faldambiyeedyada noocaan oo kale ahna xoojisaan, maxaayeelay waa fasaad bulshada lala damacsanyahay, codkiina ha gaaro kuwa leh waan idiin matalnaa, ogsoonaadana waayadii hore Xuquuq aadan leheenina iyo kuwa aanan idiinka maqneenba waad u doodi jirteen ayadoo Reer-galbeed dabada idiinka riixayo, Reer galbeedkuna falalka noocaan oo kale ahna marki idiinla geysto wixi aad xaqqa u leheedeen in idiinla oofiyaahi waa ay diideen, ma ogola dil iyo gacmagoyn midna in

la fuliyo, xabsi ama ganaax muddo kadibna cafis baa loo fidin karaa kii fal dambiyeedka geestay, marka xaquuqda haweenka sharciga islaamka ayuu ku jiraa, waa in aay ku qancaan raalina ku ahaadaan wuxu Alle ugu talagalay.

2- Fariinta labaad ee khaaska eheed waxaan u dirayaa dumarka Soomaaliyeed ee matala hablahaan la faraxumeenayo, waxaan oranayaa war walaalayow kuraastu ma matalaadda haweenka ayaad ku hesheen mise adinkaa shaqeestay oo dhacsaday?

Hadii aad tan hore ku hesheen waa in aad dhacdooyinka noocaan go’aan cad ka gaartaan, waxna u

qabataan kuwa aad sheegateen matalaadoodu, maxaayeelay arintan wa arin adinka idiin taal wax badanna ka qaban kartaan, falalka noocaan oo kala ah wadama aanan diin islaam heysan waxa eey ku fuliyaan qofki sameeyaa xukun dil ah, sidaana waxaa ku yaraanaya fasaadka.

3-Fariinta sedexaad anoo soo koobaya waxaan u dirayaa dhaliyarada Soomaaliyeed, waxaan oranayaa walaalayaalow ilaahey ka yaaba, hadii aad tihiin dhalinyaro diin islaam heysato Alle iyo aakhiro aaminsan waxaad ogsoonaataan in hadii aad ku hamineysaan in falal noocaan oo kale ah aad sameysaan ogsoonaada in aad ku khasaari doontaan, dhinac walbey

ahaataba, tan ugu horeyso waa Caro Rabbi, Allana haduu kuu caroodo raaligelin weysana ku tasho ciqaabtiisa, Alle hadii aad ka baqanweysid waa in aad naftaada u baqdaa! Ujeedkeygu maaha nin ilaahiis ka baqanwaayay muxuu nafsadiis u baqaa! Balse waxa ay iga tahay falka aad sameesay ama damacsantahay in aad sameyso sow maahan wax ay naftaadu jeceshahay sow maahan in aad raaxo dareento, waa haa! Wlh in aadan raaxo ku dareemeen falkaas shan daqiiqo ama toban waa wax uu sheydaan kuu macaaneynayo kulana qaraaraanayo kolkaad dhameysato mooyaane inaysan wax raaxa ah eheen, qoomamo

iyo ciil un baa kaaga dambeen iyo weliba fadeexo.

Kooxdaan aan ka hadlayay koox kale oo aanan ka shar liidan baa jiraan, kooxdaanna waa koox aanan falka ayagu sameyn balse weynan u suuragaleen maahine kama aaleen, kuwaana fariinti kuwi hore aan u diray bay la wadaagi inti aan u xusayna waan rajeenayaa in aay soo aqriyeen maskaxdooduna waxaan rajeenayaa in ay waasac noqoto waxaan qurunka isaga haraan kana Towbad keenaan inta aanan laga xirin irideeda.

Ragga qeybta sadaxaadna waa kuwa iska dar Alla ah wax bey wanaag u samee isleeyihiin markaas bey xumaan ka

dhalanee, waana mid u baahan in ay lagu wacyigeliyo, fiidiyow ama sawir foolxun ayey Faallo ka bixinayaan ayagoo habaaraya ama caaynaya ama waaninaya markaas buu fiidiyowgi ku faafi baraha bulshada, taasna waa in laga digtoonaadaa dadkana laga wacyigeliyaa.

4-Fariintii iigu dambeysay waxaan u dirayaa Ummada Soomaaliyeed, waxaan umadda ugu baaqayaa in ay Nabadda ka wada shaqeeyaan, falal dambiyeedyada isugu jiro kufsiga dilka dhaca iwm ee soo noqnoqda waxaa looga bixi karaa in la helo Dowlad ka shaqeyso dalkoo idil, sanadkaan xaq uma lihidiin in aad adinka wax doorataan, haduu idiinku soo aado madaxweyne xun Alle u barya in

uu idiin wanaajiyo, adeecana waa hadii uunan macsi Alle iyo rasuulkii idiin fareen, lana shaqeeya, dalkiinana nabadeesta si aad dullinimada uga baxdaan iyo qaxootinimadaan dabadheeratay, afar sano hadda ayey imaaneysaa kolki aad fursad u heshaan in aad wax doorataan war Soomaaliyeey qabiil haku dooranina ee kan dalka wax tari karo doorta, taa waxaa ku jirto horumarkiina, balse hadaad ku doorataan qabiil wallaahi kaad doorateen iyo wixi la shaqeeyo ayey horumar ugu jirtaa, nin qabyaalad lagu doortana qaran waxmataro, ee aan ahaano qarandoon qabyaaladduna diidno.

Intaas ayaan kusoo gabagabeenayaa wabillaahi towfiiq.